Waa maxay P-EBT?

Barnaamijka Pandemic-EBT (P-EBT) waa barnaamij federaal ah. Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee (Tennessee Department of Human Services, DHS), oo kaashanaysa Waaxda Waxbarashada ee Tennessee (Tennessee Department of Education, TDOE), ayaa heshay oggolaansho ay ku socodsiinayso barnaamijkan iyada oo laga jawaab celinnayo xirnaanshaha iskuulka ee la xiriira cudurka COVID-19. P-EBT waxay fidisaa ama bixisaa taakuleyn cunno ah si qoysaska caruurta leh oo ardaydooda iskuulka laga siinayay ama ka helayay cuntada bilaashka ah iyo cuntada sicirka la dhimay ee iskuulka laga bixiyo ina la siiso caawinaad dhinaca cuntada ah.

Yaa xaq u leh manfacyada/lacagaha?

Waxaa jira 2 qodob oo muhiim ah ee xaq u yeelashada.

1. Ilmaha waa inuu u-qalmaa cunnooyinka dugsiga laga bixiyo ee bilaashka ah ama qiime jaban ah ee hoos yimaada Barnaamijka Qado ee Dugsiga Qaranka. Tan waxaa ka mid ah arday kasta oo ku jira iskuul oo cunno bilaash ah siiya dhammaan ardayda (iyadoo loo marayo sharci gaar ah oo loo yaqaan "Bixinta U-Qalmitaanka Bulshada").

2. Oo, cunuggu aan hadda cunnooyin bilaash ah ama qiimo jaban aan ka helayn maxaa yeelay iskuulku oo xiran darteed ee iskuulka la tagi jiray awgeed; ama tago wakhti cayiman ama saacaddo cayiman ugu yaraan 5 maalmood oo isku xigta sannad dugsiyeedka hadda socda.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Barnaamijka Qado ee Dugsiyada Qaranka booqo:

https://www.tn.gov/education/health-and-safety/school-nutrition/free-and-reduced-price-meals.html

Yaa go'aaminaya haddii cunug/arday uu u qalmo barnaamijka P-EBT?

Dugsi kasta/degmo dugsiyeed kasta waxay DHS siisaa macluumaad ku saabsan ardayda u-qalma inay helaan P-EBT. Haddii adigu aadan hubin haddii ilmahaagu uu helayay cunnooyin bilaash ah ama qiimo jaban iskuulka laga siinayay, ama haddii ilmahaagu dhigto iskuulka Bixinta U-Qalmitaanka Bulshada, kala xiriir dugsiga wixii faahfaahin ah.

Goorma ayaan helayaa manfacyadayda barnaamijka P-EBT?

Bisha Maarso dhexdeeda, kaararka cusub ee P-EBT ga ayaa loo soo diri doonaa ardayda u qalanta ee lagu soo shubo lacagaha bilaha iskuulka ee Oktoobar iyo Nofeembar. Fadlan xafid kaarka cusub, maadaama ardayda uqalma loogu soo shubi doono lacagaha kaarkooda P-EBT ga 20ka bil kasta ee sanad dugsiyeedka inta ka harsan ee 2020-2021.

Meeqaa ayaan helayaa?

Qaddarka lagu soo shubayo P-EBT ga waxaa sal loogu dhigayaa arday walba xaaladdiisa waxbarasho ee iskuulkiisa taasoo ay xaqiijisay iskuulkooda waxayna ku kala duwanaan kartaa arday ilaa arday, xitaa qoys ahaan.

Qaddarku waxaa lagu saleeyaa arday walba xaaladdiisa waxbarasho ee bilihii hore. Tusaale ahaan: lacagtaada P-EBT ga ee bisha Maarso waxaa sal looga dhigi doonaa xaalada waxbarasho ee ardaydaada bisha Oktoobar iyo Nofeembar labadaba.

Waxaad ka hubin kartaa kaarkaaga P-EBT ga inta ku jirta www.connectebt.com ama adiga oo waca lambarka dhabarka kaarkaaga P-EBT ga ku qoran.

Sidee ayaan ku helayaa manfacyadayda barnaamijka P-EBT?

Waxaad heli doontaa kaarka P-EBT ga ee loogu talagalay cunug kasta oo xaq u leh ee reerkaaga ah oo lagu soo diro cinwaanka uu dugsigu bixiyay. **Si loo hubiyo in anagu aan kaa hayno cinwaankaaga oo sax ah, fadlan sida ugu dhaqsaha badan booqo https://tdhs.service-now.com/relief kontada gal/koonto ka samayso, guji batoonka Barta Waalidka (Parent Portal), oo cinwaankaaga cusboonaysii haddii loo baahan yahay.**

Muxuu ardaygaygu uu u heli waayey kaarka P-EBT?

Haddii ay kula tahay in ardaygaagu u qalmo laakiin aadan helin kaar, Wac khadka caawimaadda P-EBT lambarka waa 833-496-0661.

Cinwaankeygu waa qalad, miyaan cusbooneysiin karaa cinwaankayga?

Haa, si aad u cusbooneysiiso fadlan booqo https://tdhs.service-now.com/relief kontada gal/koonto ka samayso, guji batoonka Barta Waalidka (Parent Portal), oo cinwaankaaga cusboonaysii haddii loo baahan yahay. Sidoo kale waxaad soo wici kartaa khadka Caawinta P-EBT 833-496-0661.

Anigu ku ma raacsani lacagta P-EBT ga ee ilmahaygu helay, maxaan samayn karaa?

Qoysaska raba inay rafcaan ka qaataan waxay gali karaan Barta Internetka ee Rafcaanka: https://appealsonline.dhs.tn.gov/Home/Login ama wac (833) 496-0661. Qoysasku waxay haystaan 10 maalmood laga bilaabo taariikhda carruurtu heleen kaararka si ay racfaan uga qaataan.

Waxaa la ii sheegay in ilmahaygu ayna u qalmin inuu helo ama ay hesho kaarka P-EBT, laakiin waxaan aaminsanahay inay u qalmaan. Maxaan sameyn karaa?

Qoysaska raba inay rafcaan ka qaataan waxay gali karaan Barta Internetka ee Rafcaanka: https://appealsonline.dhs.tn.gov/Home/Login ama wac (833) 496-0661. Qoysasku waxay haystaan 10 maalmood laga bilaabo taariikhda carruurtu heleen kaararka si ay racfaan uga qaataan.

Anigu ma rabo inaan isticmaalo lacagaha P-EBT. Maxaan sameeyaa?

Haddii aadan dareensanayn in qoyskaagu u baahan yahay manfacyada P-EBT ga, oo aad jeclaan lahayd inaad diido manfacyada, fadlan iska gooy kaarka ka dib marka aad hesho. Manfacyada P-EBT ga la ma wareejin karo. Sidoo kale waxaad diidi kartaa kaqeybgalka adiga oo booqanaya https://tdhs.service-now.com/relief **Kontada gal/koonto ka samayso, guji batoonka Barta Waalidka (Parent Portal), oo oo dooro Manfacyo waan Diiday.**

Waxaan helay kaarka P-EBT ga ee ardaygayga, sideen u furaa kaarka?

Fadlan wac 1-888-997-9444 si aad kaarta u furato. Si aad u furato kaarka, waxaad u baahan doontaa afarta (4) lambar ee ugu dambeeya kaarka P-EBT. Markii lagu weydiiyo afarta (4) lambar ee ugu dambeeya lambarka sooshiyal sekuuritiga ee ilmaha, waxaad gelisaa 0000 iyo taariikhda dhalashada ilmaha ku qoran kaarka dushiisa. Inta aad ku jiro furitaanka kaarka waxaa laguu tilmaamayaa inaad

doorato afar lambar oo aqoonsi shaqsiyeed (PIN) ah oo aad ugu adeegsan doonto dukaamada oo ay la socoto kaarka si aad wax ugu soo iibsato manfacyada kaarka lagu soo shubay.

Ma waxaa la iiga baahan yahay inaan kaarka P-EBT ga ee ardaygayga aan u furo taariikh cayiman?

Waalidiin/qoysas kasta waxaan ku dhiiri galinaynaa inay furaan kaarka P-EBT ga ee ardayga isla marka kaarka la helo.

Ma waxay tahay inaan wada isticmaalo dhammaan manfacyada P-EBT ku jiro markaan helo kaarka?

Maya. Manfacyada P-EBT lagu soo shubo oo aadan isticmaalin lacagtaas waxay sii socon doontaa bil ka bil oo way ku sii jiri doontaa. Lacagaha aan la isticmaalin ayaa laga saari doonaa kaarka P-EBT hal sano kadib.

Sideen ku hubiyaa lacagta ku jirta P-EBT?

Waxaad soo wici kartaa 1-888-997-9444 (lambarka ku yaal dhabarka kaarkaaga P-EBT ga) si aad u hubiso lacagta kaarka P-EBT ku jirta.

Waxaan waayey kaarkayga P-EBT ga. Ma heli karaa mid cusub?

Haa. Booqo www.connectebt.com si aad u codsatid kaar cusub ee P-EBT ama wac 1-888-997-9444.

Xageen ku isticmaali karaa manfacyadayda P-EBT ga la iigu soo shubo? Maxaan ku iibsan karaa lacagta kaarka lagu soo shubo?

Waxaad ku isticmaali kartaa manfacyadaada P-EBT ga lagu soo shubo dukaan kasta oo aqbala SNAP, oo ay ku jiraan interneetka ee Aldi (via Instacart), Amazon iyo Walmart. Dukaammada badankood waxay leeyihiin calaamado sheegaya inay aqbalaan SNAP ama EBT.

Ka waran haddii aanan isticmaalin dhammaan lacagaha P-EBT ga ku jirta?

Manfacyada P-EBT lagu soo shubo oo aadan isticmaalin lacagtaas waxay sii socon doontaa bil ka bil oo way ku sii jiri doontaa. Lacagaha aan la isticmaalin ayaa laga saari doonaa kaarka P-EBT hal sano kadib.

Maxaan ku iibsan karaa lacagta ku jirta kaarka P-EBT?

Waxaad ka iibsan kartaa inta badan cuntada darayga ah, qasacadaysan, barafeysan waxyaabaha ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobnayn oo kaliya:

- Qudaarta iyo miraha fareeshka ah
- Hilib, caano iyo ukun
- Bariis, digir iyo cuntooyinka qalalan
- Miro si aad dhir u abuurato

Maxay yihiim waxyaabaha AADAN ku iibsan karin lacagta ku jirta kaarka P-EBT?

Waxyaabaha **AADAN** iibsan karin waxaa ka mid ah:

- Cunnooyinka la diyaariyey oo la iibiyo iyagoo karsan ama diyaar ah in la cuno

- Xafaayaddaha
- Waxyaabaha nadiifinta alaabada
- Warqadda musqusha, tuwaallada waraaqaha, iwm.
- Kaabis / dawo
- Cunnada xayawaanka
- Qamriga

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan cuntooyinka lagu iibsan karo booqo: https://www.fns.usda.gov/snap/eligible-food-items

Ma ku isticmaali karaa lacagaha P-EBT si aan ugu iibsado cuntada lagu iibiyo interneetka?

Haa! Waxaad ku isticmaali kartaa lacagaha P-EBT Amazon (keenista oo keliya), Walmart (Ka soo qaadashada/gaarsiinta dhinacyada meelaha qaar), Aldi (via Instacart) iyo Food Lion (via Instacart).. Waxaad u isticmaali kartaa lacagaha P-EBT inaad ku soo iibsato cuntooyinka lagu iibsan kaarka SNAP. **Manfacyada kaarka P-EBT / SNAP loo ma isticmaali karo in lagu bixiyo qarashka keenista.**

Yaan kala xiriirayaa wixii su'aalo dheeraad ah ee laga qabo in aan ka qabo P-EBT?

Wixii su'aalo dheeraad ah ee aad ka qabto P-EBT, wac khadka Caawinta PEBToo ah (833) 496-0661.

Maxay tahay sababta aan u arkayo manfacyada (lacagaha) ku taxan ee loogu talagalay canugayga(carruurtayda) oo isla bisha ah?

Dugsi kasta/degmo dugsiyeed kasta waxay DHS siisaa macluumaad ku saabsan ardayda u-qalma inay helaan lacagta P-EBT. Haddii canuga loo soo gudbiyo sida inuu u qalmo in ka badan hal iskuul, waxaa dhici karta in barta Waalidka (Parent portal) aad ku aragto in ka badan hal cadad lacag ee loogu talagalay oo isla bishaa ah. DHS waxay xaqiijinnaysaa xogta loogu talagalay ardayda reer Tennessee ee xaqa u leh oo dhan – haddii howshu weli ay socoto inta bisha lagu jiro, cadada lacag ee ku jirta barta ayaa waxaa dhici karta inay ka ma dambays tahay. Fadlan markale hubi barta si aad uga fiiriso haddii ay jiraan waxyaabo kale oo soo cusboonaaday maadaama howsha xaqiijinta ay weli sii socoto.